North Central London
Integrated Care System

NHS

# Soo-jeedinada qaliinka indhaha

## Sahanka jawaab celinta



NHS-ta Waqooyiga Bartamaha London (NCL) waxay raadinaysaa jawaab celin ku aadan isbeddellada la soo jeediyay ee lagu samaynayo meelaha bukaannada qaarkood loogu qorsheeyey qalliinka indhaha. Soo jeedinta ayaa naga caawin doonta inaan samayno qiyaas ahaan 3,000 oo qalliinada indhaha ah oo dheeraad ah sanadkiiba waxaana suurtogal ah in taasi ay yarayso sugitaanada qalliinka indhaha.

Waxaan kugula talineynaa inaad isticmaasho qalabka muujinta PDF-ka, wuxuu isticmaalaa midabyo isbarbardhiga sareeya leh oo la kala xulan karo.

Waxaan jeclaan lahayn inaan maqalno fikradaha/jawaab-celinada bukaannada, dadweynaha, iyo hawlgalayaasha, fikradahaas oo ku saabsan soo jeedinta iyo inaan fahamno siyaabaha aan adeegga ugu wanaagsan u siin karno dhammaan bukaannada, haddii la fuliyo soo jeedinta. Waxaana ka mid ah dadka deggan Barnet, Camden, Enfield, Haringey, iyo Islington iyo meelaha deriska la ah kuwaas laga yaabo inay doortaan isticmaalka adeegyada isbitaalka ee NCL. Waxaan si gaar ah u xiisaynaynaa inaan maqalno fikrada qof kasta oo hadda isticmaalaya ama dhowaan soo isticmaalay adeegyada qalliinka indhaha, ama qof kasta oo laga yaabo in mustaqbalka uu u baahdo adeegyadan, iyo qoysaskooda iyo daryeelayaashooda.

## Waxa aan u raadinayno aragtidiina/jawaab-celintiina

Si NHS-ta ay u fuliso qiyaas ahaan 3,000 oo qalliinada indhaha ah oo dheeraad ah sannadkiiba gudaha NCL, ayna u yarayso sugitaanada qalliinka indhaha, waxaanu soo jeedinaynaa labo isbeddel:

1. In xarun lagu sameeyo qalliinada indhaha (ophthalmology) lagu dhex sameeyo Isbitaalka Bulshada Edgware kaas oo bixinaya qaliinada caadiga ah ee dadka waaweyn, badanaa qalliinada toosan (aanan aad u adkayn) sida indho-beelka. Arrintani waxay isu keenaysaa dhammaan qalliinada indhaha ee hadda lagu bixiyo Isbitaalka Whittington iyo qaar ka mid ah hawlaha ka socda Isbitaalada Royal Free Hospital iyo Chase Farm Hospital oo la isugu keenayo hal goob oo ku taala Isbitaalka Bulshada ee Edgware Community Hospital halkaas oo tiro badan oo qalliinada indhaha ah lagu samayn karo.

2. Tiro yar oo qalliinada iyo habraacyada indhaha ah ee u baahan in lagala shaqeeyo takhasusyo kale ayaa ka sii jiri doona labada isbitaal ee Chase Farm Hospital iyo Royal Free Hospital.

Bukaanadu waxay sii wadi doonaan inay tagaan isbitaalka xaafadooda ama isbitaalka ay doorbidaan si loogu sameeyo baaritaanada iyo ballamaha bukaan socodka kahor iyo kadib qaliinka waxayna sii wadi doonaan inay kala doortaan adeeg-bixiyeyaasha NHS ee loo gudbinayo daryeelkooda.

Adeegyada qalliinka indhaha ee hadda qorshaysan ayaa ka sii socon doona goobaha North Middlesex University Hospital iyo Moorfields oo ku kala yaala Campus Road City, Isbitaalka St Ann's Hospital iyo Isbitaalka Bulshada ee Potters Bar Community Hospital iyo adeeg-bixiyeyaasha madax bannaan ee qandaraas ku qaatay inay NHS u bixiyaan adeegyada.

Haddii la ansixiyo isbeddeladan hirgelintooda waxaa la bilaabi doonaa xilliga qaboobaha 2023/24.

Waxaad wax badan oo ku saabsan soo jeedinta ka akhrisan kartaa nclhealthandcare.org.uk/eyesurgery

## Aragtidaada noo sheeg

Fadlan noo sheeg aragtidaada adiga oo buuxinaya sahanka ku qoran boggaga soo socda.

Siyaabaha kale ee lagu bixin karo jawaab-celinta waxaa ka mid ah:

- Iimayl loo diro **nclicb.surgicalhubs@nhs.net**
- Warqad lagu soo diro **Freepost SURGERY** (looma baahna shaambad ama koodka boostada)
- Taleefanka **020 4518 7132**

Fadlan nala soo xiriir haddii aad u baahan tahay macluumaad u qoran qaab ka duwan midkaan ama aad u baahan tahay in lagaa caawiyo fikrad dhiibashada, adigoo isticmaalaya tafaasiisha kor ku qoran.

Fursadda lagu bixinayo jawaab celintu waxay furan tahay 21-ka Agoosto ilaa 16-ka Oktoobar.

Kadib muddada ka-qaybgalka jawaab-celinta, waxaanu warbixinta ku soo daabici doonaa websaydkeena iyadoo la soo koobayo wixii jawaab-celin ah oo la helo.

# Qaybta 1 - Hordhac

**Qaybta 1a – Awood noocee ah ayaad kaga jawaabaysaa sahankan? (Waxaa laga yaabaa inaad ka mid noqoto wax ka badan hal qeyb, laakiin fadlan noo sheeg qaybta ugu weyn ee adiga ku khuseysa.)**

- ☐ Bukaan/isticmaale adeeg oo hadda ama hore u isticmaalayay adeegga
- ☐ Xubin ka tirsan qoyska ama saaxiibka bukaanka/isticmaalaha adeegga
- ☐ Daryeelaha bukaanka / isticmaalaha adeegga
- ☐ Xubin ka tirsan dadweynaha
- ☐ Urur/hay'ad mutadawac ah
- ☐ Shaqaalaha bixiya adeegyada caafimaadka indhaha
- ☐ Xirfadle caafimaad ama daryeel / xubin ka tirsan shaqaalaha NHS
- ☐ Urur shaqaale ama hay'ad xirfadeed
- ☐ Hay'ad kale oo dadweyne / daneeye / wakiil siyaasadeed
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 1b – Haddii sahankaan aad uga jawaabayso ka wakiil urur ahaan, fadlan noo sheeg magaca ururka.**

**Qaybta 1c – Fadlan noo sheeg degmada aad ku nooshahay ama meesha uu ku sugan yahay ururka aad u buuxinayso sahanka.**

- ☐ Barnet
- ☐ Camden
- ☐ Enfield
- ☐ Haringey
- ☐ Islington
- ☐ Meel kale
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

# Qaybta 1 - Hordhac

**Qaybta 1d – Fadlan noo sheeg isbitaalka ay u badan tahay inaad u doorato qalliinka indhaha. Dooro hal jawaab**

- ☐ Isbitaalka Chase Farm
- ☐ Edgware Community Hospital
- ☐ Isbitaalka Jaamacadda North Middlesex
- ☐ Moorfields Eye Hospital (Goobta City Road)
- ☐ Moorfields Eye Hospital (goobta St Ann's site)
- ☐ Moorfields Eye Hospital (Isbitaalka Potters Bar Community)
- ☐ Royal Free Hospital
- ☐ Whittington Hospital
- ☐ Mid kale
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin
- ☐ Aan khusayn

**Fadlan noo sheeg sababta aad u dooratay isbitaalkan.**

# Qaybta 2 - Su'aalaha ku saabsan soo jeedinta

Si NHS-ta ay u fuliso qiyaas ahaan 3,000 oo qalliinada indhaha ah oo dheeraad ah sannadkiiba gudaha NCL, ayna u yarayso sugitaanada qalliinka indhaha, waxaanu soo jeedinaynaa labo isbeddel:

1. In xarun lagu sameeyo qalliinada indhaha (ophthalmology) lagu dhex sameeyo Isbitaalka Bulshada Edgware kaas oo bixinaya qaliinada caadiga ah ee dadka waaweyn, badanaa qalliinada toosan (aanan aad u adkayn) sida indho-beelka. Arrintani waxay isu keenaysaa dhammaan qalliinqeq indhaha ee hadda lagu bixiyo Isbitaalka Whittington iyo qaar ka mid ah hawlaha ka socda Isbitaalada Royal Free Hospital iyo Chase Farm Hospital oo la isugu keenayo hal goob oo ku taala Isbitaalka Bulshada ee Edgware Community Hospital halkaas oo tiro badan oo qalliinada indhaha ah lagu samayn karo.
2. Tiro yar oo qalliinada iyo habraacyada indhaha ah ee u baahan in lagala shaqeeyo takhasusyo kale ayaa ka sii jiri doona labada isbitaal ee Chase Farm Hospital iyo Royal Free Hospital.

Bukaanadu waxay sii wadi doonaan inay tagaan isbitaalka xaafadooda ama isbitaalka ay doorbidaan si loogu sameeyo baaritaanada iyo ballamaha bukaan socodka kahor iyo kadib qaliinka.

Adeegyada qalliinka indhaha ee hadda qorshaysan ayaa ka sii socon doona goobaha North Middlesex University Hospital iyo Moorfields oo ku kala yaala Campus Road City, Isbitaalka St Ann's Hospital iyo Isbitaalka Bulshada ee Potters Bar Community Hospital iyo adeeg-bixiyeyaasha madax bannaan ee qandaraas ku qaatay inay NHS u bixiyaan adeegyada. Bukaanada waxay sii wadi doonaan inay kala doortaan adeeg-bixiyaha NHS ee loo gudbinayo daryeelkooda.

# Qaybta 2 - Su'aalaha ku saabsan soo jeedinta

**Qaybta 2a - Iyadoo diiradda la saarayo qalliinka indhaha (ophthalmology) oo lagu qabanayo goobo yar, waxaan awood u yeelan doonnaa inaan sameyno qalliino badan oo bukaannada qaarkood ayaa la arki doonaa wakhti ka horeeya wakhtii u qorshaysnaa. Tani waxay la macno tahay in bukaanada qaarkood ay safar dheeraad ah u soo geli doonaan qaliinka, laakiin tani waxay noqon doontaa hal ama laba jeer oo keliya inta ay nool yihiin. Sidee ugu qanci lahayd inaad safar dheeraad ah u qasho qalliinka haddii ballantaada laga soo hormarinayo wakhtigii qorshuhu ahaa? (Waxaad heli doontaa fursad aad ku bixiso faahfaahin dheeraad ah marka la gaaro dhammaadka sahanka).**

- ☐ Aad loo aqbali karo
- ☐ La aqbali karo
- ☐ Aan la aqbali karin lana diidi karin
- ☐ Aan la aqbali karin
- ☐ Aad iyo aad lama aqbali karo

**Qaybta 2b - Maxay yihiin qodobada ugu muhiimsan ee NHS-ta ay tahay inay tixgeliso kahor intaysan samayn isbeddellada la soo jeediyay ee ku aadan qalliinka indhaha? Fadlan liiska hoose ka dooro ugu badnaan saddex:**

- ☐ Talo iyo taageero loogu talagalay bukaanada nugul iyo daryeelayaashooda
- ☐ Macluumaad ku saabsan adeegyada bulshada, adeegyada mutadawacnimada ah iyo adeegyada qanuuniga ah ee bukaanada siiya taageero dheeraad ah
- ☐ Websayd leh macluumaad iyo agabyo loogu talagalay bukaannada oo ku saabsan qalliinkooda
- ☐ Macluumaad ku saabsan sida isbitaalka qalliinka loogu safro baabuur ama gaadiidka dadweynaha
- ☐ Shaqaale si wanaagsan loo tababaray, taageera bixiya oo soo dhaweeya bukaanada
- ☐ Qalliinada in lagu sameeyo wakhtii loogu talagalay iyadoo ballan baajinta la yeraynayo
- ☐ Qalliinka in laga dhigo mid si sahlan looga heli karo isbitaalka oo waa inay cadaataa meesha laga doonanayo
- ☐ Fududeynta in loo bedesho isbitaal kale kadib marka uu bukaanka ku dheeraado sugitaanka qalliinka
- ☐ Wax kale (Fadlan wax badan noogu sheeg qeybta hoose ee bannaan)

**Qaybta 2c** - **Maxaa ka caawin kara bukaanada inay fahmaan xulashooyinka kala duwan ee qalliinka indhaha? Fadlan liiska hoose ka dooro ugu badnaan saddex:**

- ☐ Ka doodista marka la joogo xarunta GP-gayga
- ☐ Kala hadalka dhakhtarka indhaha
- ☐ Akhrinta macluumaadka qoraal ah
- ☐ Macluumaadka in lagu soo diro iimayl
- ☐ Ka raadinta websayd
- ☐ Kala hadlida qof bixin kara talo iyo taageero loogu talagalay bukaannada nugul iyo daryeelayaashooda
- ☐ Kala hadlida bulsho ama hay'ad mutadawacnimo oo aan ka xaadiro

**Qaybta 2d** - **Ma jiraan wax kale oo aan samayn karno si aan u wanaajino isbeddellada la soo jeediyay ee qalliinka indhaha?**

# Qaybta 3 – Adiga kugu saabsan

North Central London ICB waxaa ka go'an inay xaqiijiso in qof walba uu helo fursad uu si buuxda uga qaybqaato hawlaha iyo go'aamada ururka. Markaad buuxiso qaybta soo socota waxaad naga caawin doontaa inaan fahanno cidda aan la xiriirnay iyo sida ugu wanaagsan ee loogu adeegi karo qof kasta oo ka tirsan bulshadeena. Tani waxay noo ogolaaneysaa inaan isticmaalno jawaabahaaga si aan u aragno saameynta ay soo jeedinteenu ku yeelan karaan kooxaha kala duwan ee bulshadeena.

**Qaybta 3a** - **Da'a ahaan kooxdee ayaad ku jirtaa?**

- ☐ 16 – 18
- ☐ 19 – 24
- ☐ 25 – 34
- ☐ 35 – 44
- ☐ 45 – 54
- ☐ 55 – 64
- ☐ 65 – 79
- ☐ 80+
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

# Qaybta 3 – Adiga kugu saabsan

**Qaybta 3b - Midkee ka mid ah xulashooyinka soo socda ayaa si fiican u qeexaya sida aad naftaada u aragto?**

- ☐ Dheddig (ay ku jirto nin naag isku bedelay)
- ☐ Lab (ay ku jiraan naagaha nimanka isku bedelay)
- ☐ Aan aqoonsi gaar ah lahayn
- ☐ Si kale
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

Haddii aad dooratay 'si kale' fadlan isticmaal booska bannaan ee hoose si aad u sharaxdo aqoonsigaaga.

**Qaybta 3c - Aqoonsiga jinsigaagu ma la mid yahay jinsiga lagu siiyay markaad dhalatay?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 3d - Fadlan dooro waxa aad u malaynayso in asalkaaga qowmiyadeed uu yahay. Qowmiyadu way ka duwan tahay jinsiyadda.**

- ☐ Cadaan: Welsh/Ingiriis/Skottish/Waqooyiga Irish/Biritish
- ☐ Cadaan: Irish
- ☐ Cadaan: Safarle Gypsy ama Irish ah
- ☐ Cadaan: Asalka kale ee cadaanka ah
- ☐ Isku dhafan: Kariibiyaan Cadaan iyo Madow ah
- ☐ Isku dhafan: Afrikaan Cadaan iyo madow ah
- ☐ Isku dhafan: Cadaan iyo Aasiyaan
- ☐ Isku dhafan: Asal kale oo isku dhafan
- ☐ Aasiyaan/Aasiyaan Ingiriis ah: Hindi
- ☐ Aasiyaan/Aasiyaan Ingiriis ah: Pakistani
- ☐ Aasiyaan/Aasiyaan Ingiriis ah: Bangladeesh
- ☐ Aasiyaan/Aasiyaan Ingiriis ah: Asalka kale ee Aasiyaan ah
- ☐ Madow ama Ingiriis Madow ah: Madow – Kariibiyaan ah
- ☐ Madow ama Ingiriis Madow ah: Madow – Afrikaan ah
- ☐ Madow ama Ingiriis Madow ah: Asal kale oo madow ah
- ☐ Asal kale oo qowmiyadeed: Shiinees
- ☐ Asal kale oo qowmiyadeed: Qowmiyad kale
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

# Qaybta 3 – Adiga kugu saabsan

**Qaybta 3e - Miyaad isu aragtaa inaad naafo tahay? Qeexitaanka naafanimada sida hoos timaada Sharciga Sinnaanta 2010: Haddii aad qabto naafanimo jireed ama maskaxeed oo saamayn taban oo 'la taaban karo' oo 'muddo dheer' ah ku leedahay awooddaada ah inaad qabato hawl maalmeedka caadiga ah.**

- ☐ Haa
- ☐ Maya
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

Haddii aad doorotay 'haa' fadlan isticmaal halkaan hoose si aad u sharaxdo.

**Qaybta 3f - Fadlan sheeg xulashada sida ugu fiican u qeexaysa diintaada ama caqiidadaada.**

- ☐ Diin la'aan
- ☐ Buddhiste
- ☐ Kirishtaan
- ☐ Hinduu
- ☐ Yuhuudi
- ☐ Muslim
- ☐ Sikh
- ☐ Aan rumaysnayn jiritaanka Alle
- ☐ Diin kale
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 3g - Fadlan muuji xulashada sida ugu fiican u qeexaysa jiheyntaada galmo.**

- ☐ Jinsi caadi ah
- ☐ Khaniis
- ☐ Khaniisad
- ☐ Laba jinsiyood
- ☐ Jihayn galmo oo nooc kale ah
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 3h - Ma daryeeshaa qof u baahan caawimaad sababo la xiriira jirro, tabar darro, naafanimo, caafimaadka dhimirka ama balwad, oo aan waxba samaysan karin taageeradaada la'aanteeda?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 3i - Waa maxay xaaladdaada guur?**

- ☐ Doob, weli aan guursan
- ☐ Guursaday ama shuraako sharciyeed iskula jooga
- ☐ La nool lamaane
- ☐ Laga dhintay
- ☐ La furay
- ☐ Kala tagay
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin

**Qaybta 3j - Ma uur ayaad leedahay mise ilmo ayaad dhashay 2-dii sano ee la soo dhaafay?**

- ☐ Haa
- ☐ Maya
- ☐ Waxaan doorbiday inaanan ka jawaabin